



## Casriyeynta Dugsiga Sarre Jefferson /Xogtii Ugu dambeysay ee Mashruuca / Febraayo, 2024

Fariintani waxay qeyb ka tahay taxanayaashii caadiga ahay ee xogaha ku saabsan Mashruuca Jefferson ee hawsha ay kooxdu ka wada inagula socodsiineysa in mashruuca Casriyeyntu uu galay wajigii dib u qiimeynta. Wuxaa ka akhriyi kartaa wixii xog ah ee ugu dambeeyey [halkan](#).

Wararkeenii ugu dambeeyey markiii isukugu keen dambeysay, kooxda mashruucu waxay la shaqeynayeen kooxda nashqadeynta sidii ay u hubin lahaayeen dhowr goobood iyo qaabka dhismuhu u dabooli karo shuruudaha looga baahan yahay inuu noqdo goob waxbarasho iyo ciyaaro, labadaba inta lagu gudo jiray dhismaha iyo dhismaha joogtada ah. Dib u eegista waxaa sidoo kale ka mid ah in si dhow loola shaqeeyo Ciyaaraha PPS, sababtoo ah waxay u baahan yihiin garoono aad u waaweyn iyo gooba jimicsiyada oo u baahan in laga gaadho go'aano naqshadooda. Qandaraaslaha mashruuca wuxuu sidoo kale ka qeybgalayey sidii u tallo u siin lahaa sida dhismuhu u dhici doono iyo qaabab kale gedisan.

Iyada oo la eegayo qaabab kala gedisan waxay ay caawisay kooxda mashruuca sidii ay u aqoonsan lahaayeen su'aalaha ku saabsan Sharciyada Dhismaha Magaalada (City Building Codes) waxaan kaga wada hadlin doonaa shirkayaga soo socda ee Gargaarka Hore ee magaalada Portland. Waxaa ka mid ah su'aalaha ku saabsan nidaamka dib ugu eegista naqshadeynta, dhismaha iyo dib u dhacyada dhulka, heerarka horumarinta, iyo shuruudaha gaadiidka Magaalada, biyaha iyo kaabayaasha la xidhiidha goobaha bulaacadaha.

Kooxda mashruucu waxay [xog kooban siiyeen Golaha Waxbarashada bishii Janaayo 23keeda](#). Kooxdu waxay xaqiijiyeen inay siin doonaan qorshe dib loo eegey Guddida Hawlgal iyo Golaha Dhismayaasha bisha Maarsa 20, iyo Golaha Dugsiyada oo isku dhan marka la gaadho bisha Abriil 2deeda. Qorshaha dib loo eegay waxaa ku jiri doona qiyaasta kharashka oo laan si dhab aheyn loo qiyaasay.

Qaar ka mid ah xubnaha bulshada ayaa waxay muujiyeen walaac ay ka qabaan Dugsiga Jefferson inuu hadda noqon doono dugsigii sarre ee ugu dambeeyey ee dib loo casriyeyey. Guddida Hawlgalka iyo Golaha Dhismayaasha waxay si cad ugu caddeeyeen kooxda Mashruuca

Jefferson iyo bulshada Jefferson inuu noqon doono dugsiga sarre ee soo socda ee dib u casriyeyntiisa la dhammeystiri doono.